

**Shuruudaha amaahsashada, CPAP, Hjälpmadelcentrum****Shuruudaha amaahsashada waxyaalaha/farsamada  
caawinaad ahaan la adeegsado**

Waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado, waxaa laga amaahda Maamulka Gobolka Västmanland. Xilliga amaahsashada adiga ayaa mas'uul ka ah waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado ee aad amaahatay.

Kharash 500 kr oo hal mar u qura ah ayaa bixinaya markii qalabka CPAP lagugu tijaabinayo. Laakinse macneheeda ma ahan in waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado aad iibsatay. Milkiyeha qalabka waxaa weeyaan maamulka gobolka.

Qodobada shuruudaha amaahdan ee qoraalkaan ku xusan, way ciribtirmayaan haddii Goleha Gobolka uu go'aan kale oo xiriir la leh kharashyada qalabyada CPAP u gaaro.

Haddii hawladdenaha ku qoray in lagu siiyo qalabka/qalabyada u soo gabagabeeyo daryelida, ama aadan sidii berri hore waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado u isticmaalin, waa inaad kaddib markii aad si fiican u nadiifisay dib ugu soo celisa Rugta sambabaha [Lungmottagningen], Xarunta Waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado ama rugta daryeel-caafimaadeedka ee aad ka tirsan tahay.

Dawaynta/daryelidda haddii aynan kugu filnayn, la xiriir Rugta sambabaha [Lungmottagningen]

Haddii waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado ay cilladaysan yihiin, ama u baahan tahay waxyaalaha noolol-maalmeedyada la adeegsado ee cusub, la xiriir Xarunta [Hjälpmedicscentrum].

**Warbixin xiriir la leh caymiska waxyaalaha/farsamada  
caawinaad ahaan la adeegsado**

Qofka adigoo kale ah oo ku talo jiro in uu amaahdo waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado, waxaa lagugu gubaabinayaa inaad la xiriirto shirkadda caymiska aad heshiiska la gashay, kaddib ka hubso in waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado ee aad amaahatay ay caymasan yihiibn. Waxaa dhici karto inaad u baahan tahay caymis dhamaystirid ah.

Qofka adigoo kale ah oo ku talo jiro in uu amaahdo waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado:

- Waa inaad la xiriirto shirkadda caymiska aad heshiiska la gashay, kaddib ka hubso in waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado ee aad amaahatay ay caymasan yihiin. Waxaa dhici karto inaad u baahan tahay caymis dhamaystirid ah.
- Kharashka caymiska waa in adiga aad bixisa.

Waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waa hanti oo loogu talagalay inaad gaar ahaan u isticmaasho. Shirkadaha caymiska badidooda waxaa lagu tiriya in ay yihiin waxaa kolba meel loo rari karo. Caaladdaas caymiska wuxuu daboola xatooyo iyo dab-kaca. Waxaa dhici karto inaad u baahan tahay caymis dhamaystirid ah.

## Shuruudaha amaahsashada, CPAP, Hjälpmadelcentrum

### Haddii wax dhacaan:

Haddii waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado cillad yeeshaan, la xado ama la waayo La xiriir hawladdenha ku qoray in lagu siiyo in uu kuwa cusub ku qoro. Haddiise waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado cilladaysan yihiin, wuxuu hawladdenha amar siinayaa qof farsameyaqaan ah in u hagaajiyo. Xitaa adiga haddii waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado ay cilladaysan yihiin waad la xiriiri kartaa Xarunta [Hjälpmedelscentrum].

Haddii waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado laga xado waa inaad ciidanka booliska wargeliso. Caddaynta wargelinta booliska waa inaad kaddib u dirla Xarunta [Hjälpmedelscentrum].

Haddii taxadardarro u dhacaan waxaa waajib kugu ah bixinta kharashka qiimaha waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado. Wxaana lagu dhaqaaqi doonaabaaritaanka waajibka bixinta kharasha qiimaha waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado.

Haddii dhacdada ay xiriir la leedahay socdaal ama gaadiid, sida tusaale socdaal dayuurad ama gaadiidka itaaldarrada, waa in cilladda toos loo wargeliya shirkadda gaadiidka. Haddii dhacdada cillida ay dhacdo xilli socdaal dayuurad waa in wargelinta lagu dhaqaaqa markii garoonka dayuuradaha lagu sugar yahay. U sheeg in milkieyaha waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado u yahay Xarunta [Hjälpmedelscentrum], Gobolka Västmanland. Kaddib koobiga wargelinta dhacdada cilladda ama lambarka wargelinta dhacdada cilladda waa inaad u dirla [Inköpssavdelningen - Hjälpmedelscentrum, Signalistgatan 2, 72331 Västerås].

La xiriir hawladdenha ku qoray in lagu siiyo waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado ee cusub.

### Haddii la soo gabagabeeyo dawaynta/daryeelidda adiga ku gaarka ahayd

Haddii hawladdenha ku qoray in lagu siiyo u soo gabagabeeyo dawaynta/daryeelidda adiga ku gaarka ahayd, waa inaad sida ugu dhaqsida badan dib u soo celisa waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado. Haddiise aadan dib u soo celin, waxaad bixin doontaa kharashka qiimaha waxyaalahfa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado ee aad amaahatay.

Waan aqrista waana fahmay warbixinta kor ku qoran

Saxiixa

Magacyada oo saddexan

Tobbanka lambar aqoonsiga